Isbeddellada Guud ee ugu Waaweyn

Toddoaadkan, waaxaha Caafimaadka iyo Biyaha, Fayadhowrka & Nadaafadda ayaa soo saarey qaylodhaan ay ku weydiisanayaan maaliyad loo rabo waxqabadyada Soomaaliya. Labada waaxood ayaa heley wax ka yar 20 boqolkiiba maaliyaddii ay ku gudbiyeen Codsiyada Iskujira ee Soomaaliya loo sameeyey 2009ka.

Qaylodhaanta ay waaxda Biyaha, Fayadhowrka & Nadaafadda oo soo baxay 14kii Luulyo waxa lagu yiri in waaxdu ay US$11 milyan ugu baahan tahay barnaamijyada degdegga, gaar ahaan kuwa waddada Afgooye oo ay boqolaal kun oo qof ay ku barokaceen. Wada-hawlgalayaasha waaxdan waxa ay awoodaan oo keliya in ay qofkiiba biyo celceliskoodu yahay 6.3 litir maalintii ay ku siiyaan Afgooye iyo meelo kale; dadka qaar ayaa hela wax ka yar 2 litir oo biyo ah maalintii. Fayadhowrka ayaa sidoo kale aan ku filneyn; haddana waxaa jirta in celcelis ahaan musqishiiba ay wadaagaan 212 qof oo barokacay. Jaangooyooyinka SPHERE ayaa u qorey in musqushiiba ay wadaagaan 20 qof. Ilaa 14kii Luulyo, waaxdan waxa ay heshey keliya 18 boqolkiiba maaliyaddii ay u baahneyd.

Wada-hawlgayaasha waaxda caafimaadka waxa ay qaylo-dhaan u direen deeq-bixiyeyaasha 16kii Luulyo taas oo ay ku sheegeen in dagaalka sokeeye ee Soomaaliya uu saameyn aad u ba'an ku yeeshey kaabayaashii adeegyada bulshada, gaar ahaan caafimaadka, ee gobollada Koonfurta/Bartamaha dalka. Qaylodhaanta ayaa ku tilmaantey in Dadka Gudaha Ku Barokacay iyo bulshooyinka nugul ay baahi caafimaad oo ba'an u qabaan in la wanaajiyo soo gaaridda iyo helidda daryeelka uurreyda iyo umulaha ee ay bixiyaan dad xirfad u leh. Waxaa iyana muhiim ah in si joogto ah adeegyada caafimaadka ee aasaasiga ah iyo kuwa sareba oo ay ku jiraan daawoooyinka nafaha lagu badbaadiyo iyo sahayda kale ee caafimaadka/dhaawacyada, gaar ahaan ay u helaan xerooyinka Dadka Gudaha Ku Barokacay iyo degsiimooyinka aan qorsheysneyn ee sii ballaaranaya. Ilaa 16kii Luulyo, waaxdan waxa ay heshey keliya 12 boqolkiiba maaliyaddii ay u baahneyd.

Dagaalladii u dhexeeyey ciidamada dowladda iyo muqaawamada ayaa toddobaadkan ka socdey Muqdisho. 11kii – 12kii Luulyo, ugu yaraan 50 qof ayaa lagu diley oo in ka badan 120 qof oo rayid iyo dagaalyahanno isugu jira ayaa ku dhaawacay degmooyinka Cabdulcasiis, Shibbis iyo Yaaqshiid ee waqooyiga Muqdisho. Ugu yaraan 135,000 oo qof ayaa barokacay ilaa 1dii Juunyo, iyada oo 34,000 ay u guureen goobo kale oo isla magaalada Muqdisho ah. ilaa 37,000 waxa ay u guureen waddada Afgooye halka 63,000 ay u dhaqaaqeen qaybo kale oo Soomaaliya ka tirsan. War 16kii Luulyo uu soo saarey Ururka Caalamiga ah ee Laanqeynta Cas (ICRC), ayaa sheegey in ku dhowaad 300 oo bukaanno qaba dhaawacyo hub ka soo gaarey la dhigey cusbitaallada Keysaney iyo Madiina ilaa dhammaadkiii toddobaadkii hore. "Dhakhaatiirta iyo kaalkaaliyeyaasha ayaa u shaqeynaya si nasasho lahayn si ay u daryeelaan bukaannada," ayaa ay tiri Valery Sasin, oo ah dhakhtarad qalliin oo xiriirineysa hawlaha caafimaadka ee ICRC ka waddo Soomaaliya.

Waxqabadka

Toddobaadka dhexdiisa, UNFPA iyo la-hawlgalayaal degaanka ka socda ayaa xirmooyin caafimaad u qaybiyey 1,000 haween barokacay ah oo ku nool afar degsiimo oo ku yaalla waddada Afgooye. Xirmo caafimaad waxa ay ka kooban tahay saabuun, shukumaan/tuwaal, oomo iyo caafi-dhowr, iyo waxyaabo kale.

ACF ayaa aqbashey 135 carruur ay hayso nafaqo-xumo oo ka mid ahaa 336 carruur ah oo Muqdisho lagu baarey labadii toddobaad ee la soo dhaafey, halka 823 carruur kale ah lagu daaweynayo Barnaamijyada Quudin ku daweynta Bukaan-socodka iyo Barnjaamijyada Quudin Ku Daweynta Bukaan-jiifka ee Muqdisho. Magaalada Waajid ee gobolka Bakool, 90 carruur ay hayso nafaqo-xumo ba'an oo ka mid ahaa 203 la baarey ayaa iyagana la aqbaley, halka 654 kale oo carruur ah lagu daweeyey sagaalka Barnaamij ee Daaweynta Bukaan-socodka iyo kuwa Daaweynta Bukaan-jiifka ee gobolka.

Somaliland, ayaa WFP iyo la-hawgalayaasheeda ay 537 metrik ton oo cunto ah u qaybiyeen 59,305 ka faa'iideysteyaal oo ku nool degmooyinka Hargeysa, Laas Caanood, Caynabo iyo Berbera. Puntland, ayaa 7,182

ka faa'iideysteyaal ku heleen 92 metrik ton oo badeecooyin cuntooyin kala duwan oo hoos imanayey barnaamijka cunto-tababar-ku-beddeleshada ee magaalada Qardho, kuwaas oo ay ka mid ahaayeen 100 qof oo la nool HIV/AIDS oo heley 10 metrik ton. Ilaa 373 bukaannada qaaxada ah ayaa heley 38 metrik ton oo cunto hoos imaneysey barnaamijka quudinta hay'adaha ee magaalada Boosaaso. Gobollada Bakool, Baay, Gedo, Hiiraan iyo Galgaduud ee Koonfurta/Bartamaha Soomaaliya, ayaa 210,630 qof ay ku heleen badeecooyin cunto ah, halka barnaamijyo quudin dheeri ah iyana laga fuliyey gobolka Mudug. Gobollada Jubbada Dhexe iyo Jubbada Hoose, ayaa WFP iyo la-hawlgalayaasheeda ay 331 metrik ton oo badeecooyin cunto ah u qaybiyeen 3,011 ka faa'iideystayaal oo hoos imaanayey barnaamijka quudinta dheeriga ah taas oo ahayd raashinka shakhsiga iyo kan qoyska.

12kii Luulyo, daladda haweenka ee WAWA, ayaa agabka aan cuntada ahayn u qaybisey 150 haween ah oo laba toddobaad ka hor uu aafeeyey dab ka kacay degsiimada Tawakal ee Boosaaso, Puntland. UNHCR ayaa Agabka Aan Cuntada Ahayn u qaybisey 60 qoys oo uu dab kale 8dii Luulyo ku saameeyey degsiimada Inji iyo 25 qoys oo ka socdey degsiimada Tawakal ee Boosaaso.

La soo xiriir: Faahfaahinta dheeriga ah ee afka Ingiriisiga, kala soo xiriir: Rita Maingi +254 734 800 120 – maingir@un.org. Af-Soomaaliga ama Ingiriisiga, kala soo xiriir Muna Maxamed + 254 733 643 737 – mohamed26@un.org